



Maamulaha Sitton oo talo siiyay Waaxda Waxbarashada

Waa hab aad u dheer marka laga yimaado Waqooyiga Portland North Portland ee loo socdo Washington, D.C., laakiin Dana Nerenberg marnaba ma iloobin sababta ay halkaasi u joogtay: in ay matasho ardaydeeda.

Nerenberg waa maamulaha Dusiga Hoose ee Sitton, iyada oo sanad dugsiyeedkii la soo dhaafay ay sharaf u ahayd in loo doortay Qofka Danjiraha u ah Dugsiga. Barnaamijka Waaxda Waxbarashada ayaa isku keena macallimiinta iyo maamulayaasha dugsiyada dadweynaha oo ka kala socda waddanka oo dhan si ay wax uga ogaadaan isla markaana hadal uga dhiibtaan nidaamka siyaasad-dejinta ee federaalka.

“Fikradda ka dambaysaa waa in codadka dadka macallinimada ku shaqaynaya la gaarsiiyo waaxda, si dadka siyaasadda dejiyaa u dhageysan karaan dadkan sida joogtada ah shaqadan ku takhasusay.” ayay sheegtay Nerenberg. “Waxaan sidoo kale Waaxda ugu adeegnay danjirayaal ahaan, sababta oo ah marka ay noqoto barayaasha ku takhasuyay shaqada macallinimadu, shaqada ay qabato Waaxdu inta badan waa mid aan la fahmi karin.”

Nerenberg waxay awooday in ay shaqo badan qabato sanadkeeda. Inkasta oo ay wali si waqti buuxa ah uga shaqeynayso maamulaha Sitton ahaan, wakhtigeeda firaaqada ah u Nerenberg waxay dib u eegtaa qorshayaasha siyaasadeed, khudbadaha, wax kasta oo ay isleedahay Waaxda Waxbarashadu way isticmaali kartaa waayo-aragnimada qof khibrad u leh ilaa heer dugsi.

Nerenberg waxay qeexday muhiimada ay leedahay in la yeesho cod macallinka iyo maamuluhu leeyahay marka ay noqoto nidaamka siyaasadeed: “Qayb weyn oo ka mid ah saaxiibtinimada ‘fellowship’ ee xiiso leh waxay ahayd, awoodsiinta, iyada oo iga caawisay in aan noqdo nooca maamule ee aan rabay markii aan ahaa macallimada, waa mid runtii qadarisa dhammaan codadka aan la shaqeynayo. Codka macallinku waa qayb aasaasi ah oo ka mid ah saaxiibtinimada ‘fellowship’ waxayna aad muhiim ugu ahayd waaxda si ay uga faa’iideysato ilaha hodanka ah ee xirfadlayaasha laga helo.”

Saaxiibadu waxay afar jeer ku kulmeen DC, intii taasi u dhaxaysay waxay qabanayeen wicitaanada telefoonka oo toddobaadle ah si ay uga hadlaan shaqadooda.

Nerenberg iyo saaxiibada kale waxay sidoo kale dhex qaadeen biyaha siyaasadeed iyada oo maamulka Obama uu ku wareegayay Madaxweyne Trump iyo Xoghayihiisa Waxbarashada, Betsy DeVos. Laakiin iyada aanan la mid ahayn, kuwa aragtidooda ku saabsan xaalada hadda ee Waaxda Waxbarashada kaliya ka hela warbaahinta, Nerenberg waxay haysaa aragti toos ah. Kama aysan xishoonin iyadu sheegida ra’yigeeda gaarka ah.

“Xoghaye DeVos iyo qaar badan oo ka mid ah shaqaalaha sare aad bay u xiiseynayeen in ay wax ka maqlaan kuwa naga midka ah ee haya shaqada macallinimo,” ayay sheegtay Nerenberg. “Kala doorashada Dugsiga’ waa mid ka mid ah talaabooyinkeeda ugu weyn waxaan awoodnay in aanu si toos ah u sheegno waxyaabaha dadka walwalka ku dhaliya ee la xiriira noocaasi siyaasadeed.”

Nerenberg waxay waayo-aragnimada ay u leedahay kuwo badan oo ka tirsan qoysaska Sitton u isticmaashay in ay muujiso sababta aanay kala doorashada dugsigu iyaga u ahayn mid dhankooda ka shaqayneysa. Sitton wuxuu ku yaala dhinaca waqooyi ee magaalada, iyada oo qaar badan oo ka mid ah qoysaskeedu ay yihiin kuwo aan u dhalan waddanka oo ku hadla Ingiriisiga. Nerenberg waxay sheegay in aysan sahlamayn in dad badan oo iyaga ka mid ah ay ka gudbaan nidaamka maamul ee degmada.

Qaar badan oo ka mid ah qoysaska Sitton ayaa sidoo kale caawimo uga baahan nidaamka bakhtiyaanasiibka ee PPS, maadaama ay kuwo badan oo ka mid ahi yihiin kuwo aan u dhalan waddanka oo ku hadla Ingiriisiga. Xataa haddii ay qoysaskani “ku guuleysan lahaayeen” bakhtiyaanasiibka PPS, ama haysan lahaayeen fursad ay ku kala doortaan dugsiga, gaadiidka ka baxsan xaafada ayaa meesha ka saaraya kala doorashadaasi.

Nerenberg waxay sheegay in qaybta ugu qiimaha badnayd ee saaxiibtinimada ‘fellowship’ ay ahayd fursad ay ugu hadasho 400 ee arday markii ay joogtay Washington, D.C. “Waxay ahayd mid aad u awood leh in aan la qaybsado waayo-aragnimada bulshadayda,” ayay sheegtay.

Nerenberg waxay sheegtay in ayan dhammayn hawsha siyaasadda. Mashruuceeda xiga wuxuu noqon doonaa ka dhinac shaqeynta Ku-xigeenka Kormeeraha Guud ee Waxbarashada Dadweynaha ee Oregon, Salam Noor, oo u adeegaya guddi la talinaysa siyaasad-dejiyayaasha waxbarashada ee Oregon.

-Laura Hanson